

Fursad: Waxaan raadineynaa xubno cusub oo ka mid noqda Guddiga Arrimaha Baaskiillada Kala-taliya Magaalada Seattle! Sii akhri si aad u hesho faahfaahin iyo sida loo codsado.

Jacayl ama xiiso ma u qabtaa in aad mid amaan ah oo fudud uga dhigto dadka awoodaha iyo da'aadda kala duwan in ay ku dhex safraan magaalada Seattle? Guddiga Arrimaha Baaskiillada Kala-taliya Magaalada Seattle ayaa wuxuu raadinayaa laba xubnood oo cusub oo guddiga ka mid noqdamuddo laba-sano ah laga bilaabo dayrtan ilaa bisha Agoosto 2022. Xubnaha ayaa waxay shaqo iskaa-wax-u-qabso ah kula shaqeyn doonnaan ku dhowaad 8-10 saacadood bishii. Fadlan tixgeli in aad codsato (ama in aad ku dhiirrigeliso qof aad taqaanno) in uu codsado ugu dambeyn 30-ka bisha Oktoobar, 2020!

Guddiga Arrimaha Baaskiillada Kala-taliya Magaalada Seattle, waxaa aasaasay Golaha Magaalada Seattle, waanna guddi iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya oo soo dhaweyn leh kana ciyaara door saameyn leh gaaridda himilada Qorshaha Ballaaran ee Baaskiillada (BMP) ee Magaalada Seattle.

Guddiga Arrimaha Baaskiillada Kala-taliya magaalada ayaa Duqa Magaalada, Golaha Magaalada, iyo Waaxaha iyo Qaybaha Magaalada siiya talooyin ku saabsan mashaariicda, siyaasadaha, iyo barnaamijyada sii wanaajiya iyo/ama saameeya xaaladaha baaskiil wadidda ee magaalada Seattle.

Xubnaha ayaa iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya 8-10 saacadood bil kasta si ay u qabtaan waxyaabahan soo socda, iyo shaqooyin kale oo macno leh:

- In ay shiraan Arbacada koowaad ee bil kasta laga bilaabo 6 ilaa 8 fiidnimo (PM) (hadda la joogo dhammaan shirarka waa kuwo telefoonnada ama baraha internet-ka looga qaybgalo)
- In ay kala shaqeeyaan bulshooyinka fahamka mudnaanaha baaskiilka iyo gaadiidka
- In ay kala talitaan Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada siyaasadaha ku saabsan gaadiidka
- In ay Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) iyo waaxaha kaleba siiyaan talooyin ku saabsan mashaariciida baaskiillada
- In ay mararka qaarkood isku-duwaan shirar ka baxsan shirarka caadiga ah oo ku saabsan mowduucyo gaar ah

Shuruudda keliya ee lagaaga baahan yahay si aad u soo codsato waa in aad tahay qof deggan magaalada Seattle, codsigana waa mid fudud oo la fahmi karo.

Kumaa codsan kara?

- Shuruudda keliya ee loo baahan yahay waa in aad tahay qof deggan magaalada Seattle.
- Magaalada Seattle waxaa ka go'an kor-u-qaadista kala duwanaanshaha xubnaha guddiyadeenna.
- Mudnaanka ugu sarreysa ee Magaalada ee wareeggan codsiga soo socda – iyo wareegyada hadda ka-dib ah – waa in la helo xubno guddiga ka tirsan oo waayo-aragnimo iyo aragtiyo ka keenaya bulshooyinka midabka, gaar ahaan bulshooyinka Madowga iyo/ama Asaliga ah.

Sida loo codsado:

- Si aad u codsato, ku soo dir codsiga oo la buuxiyay iimaylkan [bikeboard@seattle.gov](mailto:bikeboard@seattle.gov) ugu dambeyn 30-ka Oktoobar, 2020.
- Haddii aad qabto su'aalo, ama haddii aad jeclaan lahayd in aad codsato tarjumaadda ama diyaafadin kale oo macquul ah, fadlan la soo xiriir Simon Blenski adiga oo iimayl ugu soo diraya [bikeboard@seattle.gov](mailto:bikeboard@seattle.gov) ama wacaya 206-615-1207.

Haddii iimayl ku soo diridda codsiga aysan suuragal ahayn, fadlan daabac ka-dibna u soo dir codsigaaga adiga oo soo marsiinaya Boostada Mareykanka cinwaankan:

Seattle Department of Transportation  
Attn: Simon Blenski, 3784H  
P.O. Box 34996  
Seattle, WA 98124-4996

Haddii aad nagala socoto baraha bulshada, waxay u badan tahay in aad hayso fikrado ku saabsan baaskiil wadidda iyo dhismayaasha baaskiilka.

Haddii aad doonayso in aad gacan ka geysato fikradahaasi u beddel siyaasado, waa in aad codsataa si aad ugu biirto Guddigeenna Arrimaha Baaskiilada Kala-taliya magaalada. Codsiyadu waxay ku egyihiin 10/30!